

HUMAN RIGHTS WATCH

# “Waa Sida Inaan Marwalba Ku Jirno Xabsi”

## Tacaddiyada Ka Dhanka Ah Wiilasha Lagu Eedeeyay Dembiyada Ammaanka Qaran ee Soomaaliya

# “Waa Sida Inaan Marwalba Ku Jirno Xabsi”

## Tacaddiyada Ka Dhanka Ah Wiilasha Lagu Eedeeyay Dembiyada Ammaanka Qaran ee Soomaaliya

# Soo Koobid

Dhammaadkii sanadkii 2015 ururka Al-Shabab ayaa magaalada Marka waxa uu ka afduubay Xamsa oo 15 jir ah, waxaana la geeyay mid ka mid ah xeryaha tababarka ciidan ee ururkaasi. Ka dib tababar socday laba bil iyo bar, oo lagu barayay sida loo adeegsado qoriga AK-47, ayaa Xamsa waxa uu ka mid noqday in ka badan 64 canug oo Al-Shabab ay u dirtay duulaankii uu u ururkaasi bishii Maarso 2016 ku qaaday Puntland.

Xamsa ayaa ka mid ah carruur tiro yar oo ka badbaaday duulaankaasi, waxaana qabtay oo xabsiga dhigay milateriga Puntland. "Afar ka mid ah askarta Puntland ayaa i garaacay," ayuu Xamsa u sheegay Human Rights Watch, asagoo intaa raaciyay "Garba-duub ayay ii xireen, ayagoo xariga adag iiga xiray lugaha iyo gacmaha. Qoriga baadkiisa ayay ila dhaceen, dhowr jeerna xabadka ayay iga laadeen. Ka dib waxay igu tureen gaarigooda."

Ka dib lix bilood oo uu ku xirnaa magaalada Garowe ee xarunta maamulka Puntland, ayaa Xamsa waxaa lasoo taagay maxkamad milateri asagoo lagu eedeeyay fallaaganimo iyo argagixisanimo. Waxa uu sharraxaad ka bixiyay maxkamadeyntiisa:

> Dacwad oogaha maxkamadda milateri ayaa i weydiiyay magaceyga, inaan la dagaallamay Puntland, halka la igu qabtay, iyo inaan qori watay. Keligey ayaan ahaa, qareenna ma haysan.
>
> Waxaa maxkamadda horteeda la iga weydiiyay inaan dembiga galay, waxaan ugu jawaabay inaan qori sitay, balse aan dagaallamayn. Garsooraha ayaa yiri, "Haddii aad qori sidatay, waxaad qeyb ka ahayd Al-Shabab."

Waxaa lagu xukumay 10 sano oo xabsi ah. Waxaa loo wareejiyay xarun lagu dhaqan-celiyo carruurta, balse xukunkiisa lama baabi'in.

Xamsa ayaa u sheegay Human Rights Watch inuu dareemayo in laba jeer la dhibaateeyay: "Waxaan dareemayaa cabsi iyo niyad jab. Al-Shabab waxay igu qasbeen arinkan, ka dibna dowladda ayaa igu xukuntay xabsi muddo dheer ah.

Dhammaan dhinacyada ku lugta leh colaadda hubaysan ee Soomaaliya ka jirtay mudada 25-ka sano ah ayaa carruur qortay, ayagoo ka dhigay askar, xamaali, basaasiin ama kuwo u jooga isbaarooyinka. Tobankii sano ee lasoo dhaafay, ururka Al-Shabab ayaa qortay kummanaan carruur ah oo qaarkood ay 9 jir yihiin, waxaana uu ku qasbay inay u dagaallamaan.

Sanadkii 2014, dowladda federaalka ee Soomaaliya ayaa ballanqaaday inay si degdeg ah carruurta horay loola xiriiriyay Al-Shabab ay ugu wareejinayso hay'adaha Qaramada Midoobay iyo kuwa ka shaqeeya dhaqan-celinta ilmaha.

Tacaddiyada iyo xaaladaha adag ee ay carruurta kala kulmaan Al-Shabab ayaan ka harin marka ay gacanta u galaan dowladda, ha ahaadeen kuwo isa-soo-dhiibay, la qabtay ama lagu soo xiray hawlgallada ballaaran ee ammaanka lagu sugo. Dowladda Soomaaliya ayaa ku gabata sharci xilli hore ah oo aan si wanaagsan u shaqeyn, waxaana ay si xun ula dhaqantaa carruurta lala xiriiriyo Al-Shabab ayadoo ka dhigaysa dad waaweyn oo dembi galay, halkii ay u arki lahayd inay yihiin dhibbanayaasha colaadda.

Warbixintan waxa ay ku salaysan tahay waraysiyo lala yeeshay 15 canug oo uu ururka Al-Shabab qortay tan iyo 2015, 10 wiil oo ku jira gacanta dowladda laguna soo qabtay hawlgallo ballaaran oo ammaanka lagu sugayay, 40 waraysi oo lala yeeshay ehelada wiilal dacwadooda lagu qaaday maxkamadaha milateri, iyo tobaneeyo waraysi oo lala yeeshay qareenno, dadka u dooda xuquuqda ilmaha iyo mas'uuliyiin sare oo ka tirsan dowladda. Warbixintu waxa ay diiradda saaraysaa qaababka kala duwan, mararka qaarna xadgudubka leh ee ay dowladdu kula dhaqanto carruurta lagu eedeeyay inay xiriir la leeyihiin Al-Shabab, gaar ahaan kuwa lagu hayo Muqdisho iyo Puntland. Waxaa lagu ogaaday in xariga ay dowladda kula kacdo carruurtaasi aanu ahayn xalka kama dambeysta ah, ama aan carruurtaasi xabsiyada lagu hayn mudada ugu yar ee ugu macquulsan.

Tan iyo 2015, maamullada ka jira Soomaaliya ayaa xiray boqolaal wiilal ah oo looga shakiyay inay taageeraan ama ku biireen Al-Shabab. Mararka qaarna, ciidamada dowladda ayaa goobaha dagaalka ku qabtay wiilal la mid ah Xamsa, halka kuwo kalena lagu qabtay hawlgallada sugidda ammaanka, gaar ahaan kuwa ka dhaca caasimadda Muqdisho.

Marka la qabto carruurta, ayaa ciidanka qabtay haddii uu ahaan lahaa milateri, boolis ama sirdoon, waxa uu u gudbiyaa Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugida (NISA) ee Muqdisho, halka mararka qaarna loo gacan geliyo Hay'adda Sirdoonka Puntland (PIA) ee Bosaaso. Waxaa la xiraa mararka qaarna su'aallo la weydiiyaa ayagoo aan wax xiriir ah la sameyn karin ehelkooda, isla markaana loo diiday qareenno matala. Waxaa lala xiraa dadka waaweyn, mararka qaarna waxaa laga dhigaa go'doon. Tacaddiyadaasi oo dhan ayaa dhibaato ku ah ammaanka iyo caafimaadka carruurta, waxaana ay meel ka dhac ku yihiin waajibaadka caalamiga ah ee Soomaaliya ka saaran ilaalinta xuquuqda aadanaha iyo difaacidda carruurta.

Carruurtu kama aanay badbaadin hannaanka garsoorka Soomaaliya ee sida weyn ugu tiirsan qirashada dembiyada ee dadka qasabka looga sheegsiiyo. Carruurta ku xiran xabsiyada sirdoonka ee Muqdisho iyo Bosaaso ayaa lagu qasbay inay saxiixaan ama ay duubaan qirasho, ayagoo loo hanjabay ama la garaacay, taasoo mararka qaar u dhiganta jirdil.

Ma jiro qaab gooni ah oo ay si joogta ah dowladda ugula dhaqanto carruurta ay uga shakisay inay xiriir la leeyihiin Al-Shabab. Inkastoo ay mas'uuliyiin ka tirsan dowladda horay u qireen inay xiraan wiilasha ay u arkaan inay khatar weyn ku yihiin ammaanka, ayaa haddana waxaa jira arimo kale oo saameyn kuyeesha go'aan ka gaarida xariga carruurta, sida awooddooda dhaqaale, beesha ay ka dhaseen, iyo ahmiyadda dibedda ah ee uu kiiska leeyahay. Wiilal badan ayaa la sii dayaa ayagoo aan wax dembi ah lagu soo oogin, waxaana inta badan arintaa gacan ka geysta, isla markaana laalush bixiya eheladooda. Qaar ka mid ah carruurta ayaa waxaa lagu wareejiyaa xarumaha dhaqan-celinta ee ay maamullaan hay'adaha aan dowliga ahayn, halka kuwa kalena la horgeeyo maxkamadaha milateri ayagoo lagu dacweeyo dembi ah inay ka tirsan yihiin Al-Shabab, ama ay geysteen dilal ama dembiyo kale oo la xiriira colaadda.

Sida uu dhigayo sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha, dowladaha waxaa waajib ku ah inay garawsadaan xaaladda gaarka ah ee carruurta la qortay ama loo adeegsaday dagaallada, oo ay ka mid yihiin carruurta ku lugta leh ururada argagixisada, isla markaana laga caawiyo carruurtaasi soo kabashada jir iyo tan maskaxeed iyo inay dib ugu biiraan bulshada. Inkastoo carruurta xubnaha ka ahaa ururada hubaysan loo maxkamadeyn karo dembiyada waaweyn ee ay galeen, ayaa haddana waxaa muhiim ah in la tixgeliyo tallaabooyinka garsoorka ka baxsan, waana in hannaanka sharci uu ahaadaa mid

waafaqsan heerka maxkamadaha caalamiga ah ee carruurta, ayadoo si gaar ah loo eegayo maslaxadda canuga. Xukunka lagu rido carruurta waa inuu mudnaanta siiyaa dhaqan-celintooda iyo inay dib ugu biiraan bulshada. Guddiga Qaramada Midoobay u qaabilsan xuquuqda ilmaha, kaasoo fasira xeerka xuquuqda carruurta ee ay Soomaaliya saxiixday 2015, ayaa dalalka kula taliya inaanay carruurta marin xeerarka ciqaabta ee maxkamadaha milateri.

Inkastoo dacwadaha dhanka ammaanka ee lagu oogo carruurta iyo xariga lagula kaco aanay sidaa ugu badneyn Soomaaliya, ayaa haddana carruurta lala xiriiriyo Al-Shabab ee la horgeeyo maxkamadaha milateri waxaa laga dhigaa inay qaangaar yihiin. Maxkamaduhu ma aanay muujin hab joogta ah oo ay ku qaadaan kiisaska, ayadoo ay inta badan jebiyaan hannaanka asaasiga ah, sida in carruurta ay helaan qareenno matala, iyo in aan lagu qasbin qirashada dembi.

Human Rights Watch ayaa baaritaan ku samaysay sagaal kiis oo ay maxkamadda milateri ee Muqdisho ay xukun ku riday carruur tan iyo 2015, ayadoo carruurtaasi loo haystay inay ka tirsanaaayeen Al-Shabab ama ay u fidiyeen taageero farsamo. Tan iyo sanadkii 2016, carruur uu ka mid yahay Xamsa, iyo kuwa kasii yar oo 12 jir ah ayaa bilooyin ku jiray xabsiyo ku yaal magaalooyinka Bosaaso iyo Garowe ee Puntland, waxaana ay kasoo hor muuqdeen maxkamado milateri. Inta badan kiisaskooda ayaa xiriir la leh weerarkii Al-Shabab ay Maarso 2016 ku qaaday maamulkaasi.

Warbaxintu waxa ay si gaar ah uga hadlaysaa dacwadaha soo socda ee ay maxkamadaha milateri ku qaadeen carruurta:

- Shan canug oo lagu xiray magaalada Beledweyn, kuwaasoo 16-kii Janaayo 2017 ay maxkamadda milateri ee Muqdisho ku xukuntay sideed sano oo xabsi ah, ayagoo loo haystay inay ka tirsan yihiin Al-Shabab ("fallaago hubaysan"). Xukunka ayaa waxaa waafaqday maxkamadda racfaanka sida la sheegay. Waxay hadda ku jiraan xabsiga dhexe ee Muqdisho;
- Wiil 16 jir ah (warqadaha maxkamadda ay sheegayaan inuu 18 jir yahay) oo Muqdisho lagu xiray, ayna maxkamadda dhammaadkii 2016 ku xukuntay lix sano oo xabsi ah, asagoo loo haystay inuu xubin ka ahaa Al-Shabab;
- Sideed iyo laabatn carruur ah oo da'doodu u dhexeyso 15 ilaa 17, kuwaasoo ka qeyb qaatay duulaankii ururka Al-Shabab uu bishii Maarso 2016 ku qaaday Puntland, ayna maxkamad milateri 17-kii Sebtembar 2016 ku xukuntay xabsi u

dhexeeya 10 iyo 20 sano, ayagoo loo haystay fallaaganimo, argagixisannimo iyo inay xiriir la lahaayeen Al-Shabab. Waxaa bishii Abriil lagu wareejiyay xarun dhaqan-celinta carruurta ah oo ku taal Garowe ayna taageerto hay'adda UNICEF, balse xukunkooda lama baabi'in, waxaase laga dhigay 10 sano ka dib racfaan loo qaaday 31-kii Disembar 2017;

- Sagaal carruur ah, iyo qof canug lagu tilmaami karo oo ka qeyb qaatay duulaankii Al-Shabab ee Puntland, kuwaasoo ay maxkamad milateri 18-kii Juun 2016 ku xukuntay dil, ayagoo loo haystay fallaaganimo, argagixisannimo iyo inay xiriir la lahaayeen Al-Shabab; xukunka ayaa 26-kii Janaayo 2017 laga dhigay 20 sano oo xabsi ah, ka dib markii baaritaan ay wadajir u sameeyeen dowladda iyo Qaramada Midoobay lagu ogaaday inay 18 jir ka yar yihiin. Laba qof oo kale ayaa gadaal looga daray kooxdan. Waxaa bishii Abriil lagu wareejiyay xarun dhaqan-celinta carruurta ah oo ku taal Garowe ayna taageerto hay'adda UNICEF, balse xukunkooda lama baabi'in;
- Canug iyo wiil 18 jir ah oo ka mid ahaa todobo eedaysane oo lagu xukumay dil, ayagoo loo haystay dilalka saddex mas'uul oo ka tirsan dowladda Puntland kuwaasoo 15-kii Febraayo 2017 ka dhacay Bosaaso; waxaa xukunkooda loo bedelay xabsi daa'in ka dib racfaan ay qaateen 23-kii Maarso, ayagoo ay dowladdu u aqoonsatay inay yihiin 18 jir iyo canug. Waxay hadda ku xiran yihiin xabsiga Bosaaso; iyo;
- Canug ka mid ah lix eedaysane oo Bosaaso 21-kii Febraayo 2017 lagu eedeeyay inay ka tirsan yihiin ururka Daacish, waxaana la sii daayay bishii Mey ka dib markii ay maxkamadda horkeeneen caddeyn ah in la qabtay ayagoo kasoo goosnayay ururkaasi.

Wiilasha ku xiran xabsiga dhexe ee Muqdisho ayaa ku nool xaalad ka hooseysa heerka uu ogolyahay garsoorka asaasiga ah ee carruurta, mana helaan waxbarasho.

Inkastoo maamullada ka jira Soomaaliya ay tan iyo 2015 wareejiyeen 250 canug, kuwaasoo la geeyay xarumo dhaqan-celin oo ay taageerto hay'adda UNICEF, isla markaana ay dadka u ololeeya difaacidda carruurta sheegayaan in wareejinta carruurta ee ay sida tooska ah u samayso NISA ay korortay sanadkii 2017, ayaa arimahan waxa ay ku yimaadeen dadaallo ololeyn ballaaran ah oo ay sameeyeen shakhsiyaadka iyo ururada u ololeeya difaacidda carruurta iyo carruurta oo muddo xirnaa, halkii looga arki lahaa saansaan muujinaysa go'aanka dowladda ee ku aaddan dhaqan-celinta carruurta.

Ka dib marka carruurta lagu xareeyay xarumaha dhaqan-celinta ayaa waxaa jiray xubno ka tirsan dowladda, gaar ahaan laamaha ammaanka oo xilliyada qaar waraystay carruurtaasi, ayadoo mararka qaar aan la ogeyn sharciga ay cuskanayaan. 40 canug oo ay Puntland ku wareejisay hay'adaha sanadkii 2017 kala shaqeynayay UNICEF dhaqan-celinta ayaa weli gudanaya xabsi u dhexeeya 10 iyo 20 sano, ayagoo lagu eedeeyay fallaaganimo iyo Al-Shababnimo, arintaas ayaa dhalisay walaac ah in xarumahaasi ay yihiin kuwo edbin, balse aanay ahayn kuwo dhaqan-celin.

Waxaa kooban dusha kala socoshada madaxa bannaan ee lagu samayn karo carruurta loo hayo dembiyada ammmaanka lala xiriiriyay ee kiisaskoodu ka socdaan maxkamadaha dembiyada. Inkastoo uu wanaagsanaaday ka warqabka dowladda, ayaa haddana waxaan fursad fiican la siin hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa Soomaalida ah ee u ololeeya xuquuqda carruurta, gaar ahaan marka ay doonayaan inay tegaan xarumaha sirdoonka, xabsiyada iyo maxkamadaha milateriga. Sidoo kale, lama oga tirada carruurta ay dowladda u hayso dembiyada la xiriira Al-Shababnimada ee guud ahaan dalka, mana jiro hannaan diiwaangelin oo lagula socdo arinkaa.

Hannaanka sharci ee lagu maareynayo kiisaska carruurta lagu eedeeyay dembiyada la xiriira Al-Shabab ayaa ah mid kooban, mararka qaarna ka hor imanaya waajibaadka caalamiga ah ee saaran Soomaaliya. Hindisayaasha sharci iyo kuwa siyaasadeed ee aan la meelmarin, gaar ahaan xeerka qabyada ah ee ka hortagga argaxisada ayaa sahlaya in la xiro, oo la maxkamadeeyo carruurta lagu eedeeyo dembiyada Al-Shabab, ayadoo aan fursad loo siineyn garsoorka asaasiga ah ee carruurta, isla markaana fursado kooban loo siinayo dhaqan-celinta iyo dib-ugu-biiridda bulshada.

Walow dowladda Soomaaliya ay wajahayso khatar weyn oo dhanka ammaanka ah, ayaa haddana hab-dhaqanka hadda jira waxa uu ka hor imanayaa maslaxadda carruurta, waxaana uu wiiqi karaa dagaalka ka dhanka ah Al-Shabab, asagoona sii ballaarin kara cabsida iyo aaminaad la'aanta laga qabo laamaha ammaanka. Wiil 14 jir ah oo lagu qabtay hawlgallada ammaanka ee Muqdisho, laba bil iyo barna u xirnaa NISA ayaa yiri: "Waxaa ku haleeli kara qarax bam, ama waxaa lagugu qaban karaa hawlagallada ammaanka ee NISA. Markasta waa nala joojiyaa, oo su'aallo ayaa nala weydiiyaa. Dhinac kasta, dhibaato ayaad wajahaysaa. Waa sida inaa marwalba ku jirno xabsi."

Maadaama Al-Shabab ay sii waddo inay si sharci darra ah u qoroto carruurta, ayna u adeegsato dagaalka ka dhanka ah dowladda Soomaaliya, ayaa dowladda iyo maamullada xubnaha ka ah waxaa looga baahan yahay hab macquul ah oo ay ku wajahayaan carruurta lagu eedeeyay dembiyada la xiriira Al-Shabab, habkaasoo gundhig looga dhigayo maslaxadda carruurta.

Dowladda Soomaaliya waa inay degdeg u go'aansataa joojinta xariga aan loo meeldayin ee ay kula kacdo caruurta, ogolaataa in si nidaamsan oo madax bannaan dusha loogala socdo carruurta xiran, iyo inay carruurta ku wareejiso hay'adaha u doodad xuquuqdooda si loo dhaqan-celiyo, marka ay suuragalka tahayna loogu biiriyo bulshada.

Dowladdu ma aha in carruurta la eedeeyay ay horgeyso maxkamadaha milateri, balse waa inay dacwaddooda ku qaadaa maxkamadaha madaniga ah si waafaqsan heerka caalamiga ah ee maxkamadeynta carruurta, ayna siisaa dhammaan waxyaabaha loo ogol yahay oo ay ka midka yihiin in qareennada iyo xubnaha qoysaskooda ay markasta heli karaan. Carruurta iyo dadka waaweyn waa in loo kala soocaa qolalka xabsiga. Ciqaab kasta oo ku aaddan dembiyada waa inay ku haboon tahay da'dooda, loona tixgeliyaa bedel kale oo aan xabsi ahayn iyo in xoogga la saaraa dhaqan-celintooda iyo sidii ay dib-ugu-biiri lahaayeen bulshada.

Waa in dowladda oo gacan ka helaysa hawl-wadaageeda caalamiga ah ay samaysaa hannaan kormeer oo rayid ah, gaar ahaan madaxa xuquuqda carruurta, si uu dib-u-eegis ugu sameeyo dhammaan carruurta ay dowladdu hayso ee lala xiriiriyay Al-Shabab, iyo inay go'aansataa inuu aad u koobanaado xiriirka ay laamaha ammaanka la samayn karaan carruurtaasi marka lagu wareejiyo xarumaha dhaqan-celinta. Dowladdu waa inay xaqiijisaa in carruurta aan lala xirin dadka waaweyn, iyo inaan loo xirin oo keliya inay xiriir la leeyihiin Al-Shabab ama urur kale oo hubaysan.

Dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada oo kaashanaya beesha caalamka waa inay go'aansadaan dib-u-eegis wax ku ool ah oo lagu sameeyo shuruucda iyo siyaasada jira ama qabyada ah ee khuseeya qaabka loola dhaqmo carruurta lala xiriiriyay Al-Shabab ama lagu qabtay hawlgallada ammaanka.

Waa in dhinacyada caalamiga ah ee ku hawlan ammaanka Soomaaliya, sida Maraykanka, Britain, Turkiga iyo Isutagga Imaaraadka Carabta ay dadaalkooda isugu geeyaan sidii

carruurta ay dowladda hayso loogu wareejin lahaa xarumaha dhaqan-celinta, isla markaana ay gacan ka geystaan hirgelinta hannaan cadaalad oo u gaar ah carruurta. Waa inay ku dhiirrageliyaan xildhibaannada iyo dowladda in dembi laga dhigo isla markaana la maxkamadeeyo ciddii lagu helaa ku xadgudbidda carruurta.

# Talooyin Muhiim Ah

## Tallaabooyinka Degdeg Ah Ee Ay Qaadi Karto Dowladda Soomaaliya

- Inay joojiso dhammaan dacwadaha ay qaadaan maxkamadaha milateriga ee shakhsiyaadka da'doodu ka yar tahay 18 jirka kuwaasoo loo haysto dembiyada la xiriira Al-Shabab; ay ku amarto dacwad oogaha guud ee maxkamadda milateriga inuu dhammaan kiisaska noocaasi ah mustaqbalka ku wareejiyo maxkamadaha madaniga ah, xataa kiisaska aan la hubin in eedeysanaha uu 18 jir ahaa ama ka weynaa marka uu dhacayay dembiga lagu eedeeyay.
- Inay xaqiijisaa in carruurta aan loo xirin oo aan loo maxkamadeyn ka qeyb qaadashada colaadaha hubaysan ama inay ka tirsan yihiin urur hubaysan ayadoo aan caddeyn loogu heyn dembiyo kale oo dheeraad ah.
- Inay si aan xakameyn lahayn ugu ogolaato hay'adaha samafalka ee madaxa bannaan gelitaanka xarumaha lagu hayo carruurta, oo ay ka midka yihiin kuwa ay maamulaan hay'adaha sirdoonka.
- Inay si shaac baxsan u taageerto una xaqiijiso meelmarinta nidaamka hawlgalka caadiga ah ee soo dhaweynta iyo wareejinta carruurta laga reebay kooxaha hubaysan, ayna ku amarto laamaha ammaanka inay xaqiijiyaan in carruurtaasi hay'adaha rayidka ah ee dhaqan-celinta iyo dib-ugu-biirinta bulshada loogu wareejiyo mudada 72-ka saac ah ee loogu talagalay.
- Waa in wasaaradaha ay arinta khuseyso iyo baarlamaanka ay dib-u-eegis ku sameeyaan shuruucda federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada ee hadda jira iyo kuwa soo socda, gaar ahaan hindise sharciyeedka ka hortagga argagixisada, xeerka ciqaabta ee wax laga bedelay iyo siyaasadaha ku wajahan Al-Shabab, si ay u waafaqsanaadaan heerarka caalamiga ah ee xuquuqda carruurta iyo garsoorkooda.

## Tallaabooyinka Mudada Dhexe Iyo Kuwa Mudada Fog

- Magacaabista madaxa xuquuqda carruurta oo qeyb ka ah Guddiga Qaran ee Xuquuqda Aadana ee mustaqbalka la samayn doono, qofkaasi oo mas'uul ka ah la socoshada kiisaska carruurta lagu wareejiyay xarumaha rayidka ah ee dhaqan-celinta. Waa in mas'uulkaasi uu galaangal aan la xadidin u yeeshaa dhammaan

xarumaha lagu hayo carruurta, uuna ogyahay, qeybna ka yahay go'aannada carruurta laga sii daayo xarumaha dhaqan-celinta;

- Xaqiijinta, ayadoo taageero laga helayo beesha caalamka, in canug kasta oo lagu eedeeyo dembi heer qaran ama heer caalami ah oo lala xiriirinayo urur hubaysan maxkamadeyntiisa loo qaado si waafaqsan heerka caalamiga ah ee garsoorka carruurta, gaar ahaan ayadoo la xaqiijinayo in xariga uu yahay xalka ugu dambeeya, haddii laga fursan waayo uu noqdo mid waqtigiisu kooban yahay, in carruurta aan lala xirin dadka waaweyn, ay helaan matalaad sharci, in tixgelinta ugu muhiimsan ay tahay maslaxadda canuga, iyo in mudnaanta la siiyo dhaqan-celinta canuga iyo dib-ugu-biirintiisa bulshada.

# Talooyin

## Ku Socda Madaxweynaha Soomaaliya

- Xaqiijinta in baaritaan lagu sameeyo tacaddiyada xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah iyo sharciga bani'aadannimada ee lagu eedeeyay ciidamada dowladda federaalka, kuwa maamul goboleedyada iyo xooggaga taabacsan dowladda, oona loo baaro si dhaqsa ah, hufan oo aan eex lahayn, lalana xisaabtamo kuwa mas'uulka ka ah ayagoo aan loo eegeyn jagada ay hayaan.
- Amar ku bixinta in si degdeg ah loo joojiyo in maxkamadaha milateriga la horgeeyo shakhsiyaadka 18 jirka ka yar ee lagu eegeeyay dembiyada, gaar ahaan kuwa la xiriira Al-Shabab.
- Ku amaro dacwad oogaha guud ee maxkamadda milateriga inuu dhammaan kiisaska carruurta dembiyada loo haysto uu mustaqbalka ku wareejiyo maxkamadaha madaniga ah, xataa kiisaska aan la hubin in eedeysanaha uu 18 jir ahaa ama ka weynaa marka uu dhacayay dembiga lagu eedeeyay.
- Inuu si shaac baxsan u taageero una xaqiijiyo meelmarinta nidaamka hawlgalka caadiga ah ee soo dhaweynta iyo wareejinta carruurta laga reebay kooxaha hubaysan, uuna ku amaro laamaha ammaanka inay xaqiijiyaan in carruurtaasi hay'adaha rayidka ah ee dhaqan-celinta iyo dib-ugu-biirinta bulshada loogu wareejiyo mudada 72-ka saac ah ee loogu talagalay.
- Inuu xaqiijiyaa in carruurta aan loo xirin oo aan loo maxkamadeyn ka qeyb qaadashada colaadaha hubaysan ama inay ka tirsan yihiin urur hubaysan ayadoo aan caddeyn loogu heyn dembiyo kale oo dheeraad ah.
- Inuu ku amro xeer ilaaliyaha guud in dib-u-eegis lagu sameeyo dhammaan dhammaan kiisaska maxaabiista 21 jirka ah ama ka yar ee loo xukumay dembiyada la xiriira Al-Shabab si loo hubiyo da'dooda saxda ah. Haddii ay cadaato inay ahaayeen carruur dembi gashay, in go'aan laga gaaro in xukunkooda uu ku haboonaa da'dooda iyo in laga fekero qaabab bedel u noqon kara xabsiga, sida dhaqan-celinta, u adeegidda bulshada iyo dusha kala socod heer bulsho ah.
- Inuu si degdeg ah u joojiyo dhammaan kiisaska sugaya xukunnada dilka ah taasoo noqon karta tallaabada koobaad ee meesha looga saarayo dhammaan xukunka

dilka; inuu ugu baaqo baarlamaanka mamnuucidda in xabsi daa'in lagu rido carruurta iyo in gebi ahaanba meesha laga saaro xukunka dilka.

*Ku aaddan qabashada, xariga iyo baaritaanka ay carruurta ku sameeyaan ciidamada dowladda:*

## Ku Socda Wasiirka Amniga Gudaha iyo Taliyaha Hay'adda NISA

- Inay baaraan, sida ku haboonna u edbiyaan ama u maxkamadeeyaan askari kasta oo NISA ka tirsan ee galay ama gacan ka geystay tacaddiyada ka dhanka ah carruurta xilliga qabashada ama marka ay xiran yihiin, ayadoo aan loo egeyn jagadiisa.
- Inay xaqiijiyaan in qabashada carruurta si nidaamsan loo diiwaangeliyo, gaar ahaan ayadoo la samaynayo hannaan lagu keydiyo macluumaadkaai, si degdeg ahna loola wadaago xeer ilaaliyaha guud, wasaaradda cadaaladda iyo madaxa xuquuqda carruurta ee lagu taliyay.
- Inay ku amraan laamaha ammaanka inay si degdeg ah ula socodsiiyaan ehelada carruurta la qabtay halka lagu hayo, iyo xaqiijinta in dhammaan carruurta u xiran dowladda ay xogtooda heli karaan qaraabadooda, dadka mas'uulka ka ah iyo qareennadooda.
- Inay xaqiijiyaan in hannaanka baaritaanka shakhsiyaadka la qabtay ama la xiray ee aan u muuqan inay yihiin 18 jir ama ka weyn yihiin ay dusha kala socdaan kormeerayaal madax bannaan, gaar ahaan kuwa ku takhasusay difaacidda carruurta.
- Inay xaqiijiyaan in baaritaanka carruurta uu ka dhaco goob ammaan ah, ayna booqan karaan kormeerayaasha madaxa bannaan, howshana ay fuliyaan mas'uuliyiin rayid ah.
- Inay xaqiijiyaan in dhammaan carruurta la xiray 24 saac gudahood lagu horkeeno maxkamad xirfad leh oo qiimaysa sharcinimada xarigooda.
- Inay canug kasta oo u xiran hay'adaha sirdoonka si degdeg ah ugu wareejiyaan hannaanka garsoorka madaniga, si loogu qaado dembi la garan karo, ama la sii daayo.
- Inay ku amraan NISA iyo hay'adaha kale ee sirdoonka yareynta waraysiyada ay marxaladaha hore ee baaritaanka la yeeshaan carruurta lagu eedeeyay inay la

shaqeeyeen Al-Shabab; waa in la qaadaa waraysiyada la xiriira dacwadaha dembi ayadoo uu goobta ku sugan yahay qareenka canuga.

- Inay u ogolaadaan hay'adaha samafalka ee madaxa bannaan iyo madaxa xuquuqda carruurta ee lagu taliyay in kormeer aan la xadidin oo aan la sii shaacin ay ku tegi karaan dhammaan xabsiyada dowladda, gaar ahaan kuwa ay maamulaan hay'adaha sirdoonka iyo xarumaha lagu hayo dagaalyahannadii hore ee ay suuragalka tahay in ku jiraan carruurta.
- Marka loo baahdo qiimeynta da'da, waa inay xaqiijiyaan in howshaasi ay fuliyaan khubaro tababaran oo rayid ah, isla markaana ay waafaqsan tahay hannaanka u yaal UNICEF, gaar ahaan in mudnaanta la siiyo waraysiyo lala yeesho canuga, ehelkiisa iyo bulshada; haddii ay cadaan weydo da'da canuga, waa in loo raacaa sida uu rabo; inay tababar siiyaan dadka mas'uulka ka ah qiimeynta da'da.
- Inay xaqiijiyaan in NISA iyo mas'uuliyiinta kale ee ku hawlan baaritaanka carruurta ay helaan tababar ku haboon oo ku aaddan heerka garsoorka carruurta.
- In ayagoo taageera ka helaya wasaaradaha ay khuseeyaan iyo beesha caalamka ay dib-u-eegis wax ku ool ah ku sameeyaan dhammaan siyaasadaha degsan ee ku aaddan dagaalyahannadii hore ee Al-Shabab, gaar ahaan siyaasadda cafiska iyo barnaamijka qaran ee dagaalyahannadii hore, si loo xaqiijiyo inay waafaqsan yihiin xuquuqda carruurta ee caalamiga ah.

## Ku Socda Wasiirka Gaashaandhigga

- Inuu kala shaqeeyo ciidamada AMISOM iyo dhammaan kuwa maxalliga ah, ama ka socda dalalka gobolka iyo caalamkaba sidii loo xaqiijin lahaa in si badqabta oo degdeg ah loo wareejiyo carruurta laga qabtay Al-Shabab iyo xooggaga kale ee hubaysan.
- In canug kasta oo u xiran milateriga si degdeg ah loogu wareejiyo Qaramad Midoobay oo inta lagu guda jiro mudada 72-ka saac ah ee loogu talagalay loogu gudbiyaa hay'adaha rayidka ah ee dhaqan-celinta iyo dib-ugu-biirinta bulshada ama loo gacan galiyo hannaanka garsoorka madaniga ah, si loogu qaado dembi la garan karo, ama la sii daayo.

*Ku aaddan maxkamadeynta carruurta lagu eedeeyay dembiyo ay galeen intii ay la socdeen Al-Shabab ama urur kale oo hubaysan:*

## Ku Socda Wasiirka Cadaaladda

- Inuu xaqiijiyo aan loo xirin oo aan loo maxkamadeyn ka qeyb qaadashada colaadaha hubaysan ama inay ka tirsan yihiin urur hubaysan ayadoo aan caddeyn loogu heyn dembiyo kale oo dheeraad ah; kiisaska noocaasi ah waa in loo wareejiyaa UNICEF si waafaqsan nidaamka hawlgalka caadiga ah ee soo dhaweynta iyo wareejinta carruurta.
- Inuu Xaqiijiyaa in canug kasta oo lagu eedeeyo dembi heer qaran ama heer caalami ah oo lala xiriirinayo urur hubaysan maxkamadeyntiisa loo qaado si waafaqsan heerka caalamiga ah ee garsoorka carruurta, gaar ahaan ayadoo la xaqiijinayo in xariga uu yahay xalka ugu dambeeya, haddii laga fursan waayo uu noqdo mid waqtigiisu kooban yahay, in carruurta aan lala xirin dadka waaweyn, ay helaan matalaad sharci, in tixgelinta ugu muhiimsan ay tahay maslaxadda canuga, iyo in mudnaanta la siiyo dhaqan-celinta canuga iyo dib-ugu-biirintiisa bulshada.
- Inuu baaritaan ku sameeyaa tacaddiyada la sheego in ciidamada ammaanka ay u geystaan carruurta u xiran dowladda, iyo xaqiijinta in kuwa mas'uulka ka ah sida ku haboon loo edbiyo ama loo maxkamadeeyo.
- Inuu xaqiijiyaa in qaraabada iyo dadka mas'uulka ka ah si joogta ah loogu wargeliyaa xariga carruurta, dacwadaha loo haysto iyo marka kiiskooda la qaadayo.
- Inuu xaqiijiyaa in carruurta lagu eedeeyo dembiyada ama la horkeeno maxkamadaha ay helaan matalaad sharci oo bilaash ah kuna haboon.
- Maxkamaduhu waa inay degdeg u baaraan eedeymaha ah in maxaabiista jirdil loo geystay ama si xun loola dhaqmay, ayna meesha ka saaraan caddeyn kasta oo lagu helay qaab noocaasi ah.
- Inuu ka shaqeeyaa samaynta hannaan garsoor oo gaar u ah carruurta; mudada dhaxana uu xaqiijiyaa in tiro ku filan oo ah sharci yaqaanada madaniga ah, gaar ahaan garsoorayaasha, dacwad oogayaasha iyo qareennada difaaca ay helaan tababar ku aaddan heerarka sharciga caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha iyo cadaaladda carruurta.

- Inuu sameeyaa qaabab bedel u noqon kara xabsiyada iyo garsoorka carruurta, gaar ahaan barnaamijyada dhaqan-celinta, u adeegidda bulshada iyo dusha kala socod heer bulsho ah iyo barnaamij isugu jira tababar iyo waxbarasho.
- Inuu sameeyo nidaam lagu ururinayo macluumaadka carruurta u xiran ama kuwa loo maxkamadeynayo dembiyada la xiriira Al-Shabab.
- In asagoo gacan ka helaya beesha caalamka uu carruurta ay dowladda hayso u fidiyaa waxbarasho iyo adeegyada kale ee ay bulshada kaga mid noqon karaan, gaar ahaan in carruurta xiran ay helaan dad xaaladdooda u doodda.

## Ku Socda Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Baarlamaannada Maamul Goboleedyada

- Dib-u-eegis degdeg ah oo lagu sameeyo dhammaan dastuurrada maamul goboleedyada si loo xaqiijiyo in da'da qaangaarka ay tahay 18 jir, si waafaqsan dastuurka kumeelgaarka ah iyo Axdiga Xuquuqda Carruurta.
- In Axdiga Xuquuqda Carruurta lagu daro sharciga Soomaaliya, iyo xaqiijinta in dhammaan shuruucda cusub ama kuwa qabyada ah oo uu ka mid yahay xeerka ciqaabta ee wax laga bedelay iyo xeerka xuquuqda carruurta ee mustaqbalka ay waafaqsan yihiin waajibaadka Soomaaliya ka saaran Axdiga Xuquuqda Carruurta, gaar ahaan hubinta in guud ahaan dalka da'da sharciga ah ee qaangaarka ay tahay 18 jir.
- Dib-u-eegis lagu sameeyo shuruucda federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada gaar ahaan hindise sharciyeedka ka hortagga argagixisada iyo siyaasadaha ku wajahan Al-Shabab, si ay u waafaqsanaadaan heerarka caalamiga ah ee xuquuqda carruurta iyo garsoorkooda, ayadoo si gaar ah loo qeexayo xuquuqda ay leeyihiin carruurta lagu soo xiro ama lagu maxkamadeeyo shuruucdaasi, iyo in xabsigoodu yahay xalka ugu dambeeya, ayna ka wanaagsan tahay dhaqan-celinta.
- Mamnuucidda in xabsi daa'in lagu xukumo carruurta dembiga gasha iyo guud ahaanba adeegsiga xukunka dilka ah.
- Wax ka bedelidda siyaasadda qabyada ah ee cafiska, si loo xaqiijiyo in aanay cafis u fidin kuwa galay dembiyada dagaalka iyo tacaddiyada kale ee ka dhanka ah xuquuqda aadanaha iyo sharciga caalamiga ah ee bani'aadannimada.

- Saxiixidda iyo meelmarinta, ayadoo la kaashanayo beesha caalamka, borotokoolka khiyaariga ah ee Axdiga Xuquuqda Carruurta ka qeyb qaadata colaadaha hubaysan.
- Ansixinta tallaabooyinka lagu xaqiijinayo in dhammaan carruurta la diiwaangeliyo marka ay dhashaan, iyo samaynta hannaan diiwaangelin qaran oo lagula soconayo dhalashada ayadoo marka hore la dhaqangelinayo sharciga diiwaangelinta madaniga ah.

*Ku aaddan Dhaqan-celinta:*

## Ku Socda Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dowladaha Maamul Goboleedyada

- Inay taageeraan ballaariinta mashaariicda hubkadhigista, dhaqan-celinta iyo dib-ugu-biirinta bulshada ee carruurta ka tirsanaa xooggaga hubaysan si loo xaqiijiyo in kuwa xaqa u leh ay helaan mashaariicda ku haboon; xaqiijinta in carruurta lagu dhaqan-celiyo goobo u dhaw deegaanka ay kasoo jeedaan, haddii ay ammaan yihiin.
- Inay taageeraan barnaamijyada caafimaadka maskaxda ee la siinayo carruurta u baahan kaalmada ka ballaaran kuwa lagu helo xarumaha bulshada ee lagula tacaalo caafimaadka guud ee maskaxda.
- Guddiga Qaran ee Xuquuqda Aadanaha ee mustaqbalka waa inuu magacaabaa madaxa xuquuqda carruurta qofkaasi oo mas'uul ka ah la socoshada kiisaska carruurta lagu wareejiyay xarumaha rayidka ah ee dhaqan-celinta. Waa in mas'uulkaasi uu galaangal aan la xadidin u yeeshaa dhammaan xarumaha lagu hayo carruurta, uuna ogyahay, qeybna ka yahay go'aannada carruurta laga sii daayo xarumaha dhaqan-celinta; waa inuu si dhaw ula shaqeeyaa hay'adda UNICEF si uu u guto mas'uuliyadahaasi.

## Ku Socda Wasiiradda Amniga Gudaha iyo Cadaaladda

- In dhammaan macluumaadka khuseeya qabashada iyo xariga carruurta lagu xusaa dukumiintiyada ay gudbiso NISA ee ay helaan dhinacyada ka shaqeeya difaacidda carruurta.

- In ay caddeeyaan in carruurta lagu wareejiyay dhinacyada loo aqoonsan yahay difaacidda carruurta aanay ahayn kuwo xabsi gudanaya; ay koobnaanayaan waraysiyada ay dowladda la yeelato carruurta la wareejiyay, canuga uu yeelan karo wakiil, lagana hortagayo in markale argagax lagu abuuro carruurta.

## Ku Socda Dowladda Puntland

- Inay taageerto isbedellada sharci ee kor lagu xusay loogana gol leeyahay in dastuurka Puntland iyo shuruucda kaleba ay waafaqsan yihiin heerarka caalamiga ah iyo dastuurka federaalka, gaar ahaan in la xaqiijiyo in da'da qaangaarka ay tahay 18 sano.
- Inay si degdeg ah u joojiso dhammaan kiisaska sugaya xukunnada dilka ah taasoo noqon karta tallaabada koobaad ee meesha looga saarayo dhammaan xukunka dilka; inay ugu baaqdo baarlamaanka mamnuucidda in xabsi daa'in lagu rido carruurta iyo in gebi ahaanba meesha laga saaro xukunka dilka.
- Inay joojiso dhammaan dacwadaha ay qaadaan maxkamadaha milateriga ee shakhsiyaadka la tuhunsan yahay in ay dembi galeen ayagoo da'doodu ka yar tahay 18 jirka, ayna ka mid yihiin dembiyada la xiriira Al-Shabab.
- Inay ku amarto dacwad oogaha guud ee maxkamadda milateriga inuu dhammaan kiisaska noocaasi ah mustaqbalka ku wareejiyo maxkamadaha madaniga ah, xataa kiisaska aan la hubin in eedeysanaha uu 18 jir ahaa ama ka weynaa marka uu dhacayay dembiga lagu eedeeyay.
- Inay xaqiijiso in carruurta aan loo xirin oo aan loo maxkamadeyn ka qeyb qaadashada colaadaha hubaysan ama inay ka tirsan yihiin urur hubaysan ayadoo aan caddeyn loogu heyn dembiyo kale oo dheeraad ah; inay si shaac baxsan u taageerto una xaqiijiso nidaamka hawlgalka caadiga ah ee soo dhaweynta iyo wareejinta carruurta, ayna ku amarto laamaha ammaanka inay xaqiijiyaan in carruurtaasi hay'adaha rayidka ah ee dhaqan-celinta iyo dib-ugu-biirinta bulshada loogu wareejiyo mudada 72-ka saac ah ee loogu talagalay.
- Inay baarto ayna sida ku haboon u edbiso ama u maxkamadeyso askari kasta oo ka tirsan PIA oo lagu eedeeyay inuu geystay ama ku lug lahaa tacaddiyo ka dhan ah carruurta u xiran PIA, ayadoo aan loo eegeyn jagada askarigaasi.

- Inay si aan xakameyn lahayn ugu ogolaato hay'adaha samafalka ee madaxa bannaan gelitaanka xarumaha lagu hayo carruurta, oo ay ka midka yihiin kuwa ay maamulaan hay'adaha sirdoonka.
- Xaqiijinta in canug kasta oo lagu eedeeyo dembi heer qaran ama heer caalami ah oo lala xiriirinayo urur hubaysan maxkamadeyntiisa loo qaado si waafaqsan heerka caalamiga ah ee garsoorka carruurta, gaar ahaan ayadoo la xaqiijinayo in xariga uu yahay xalka ugu dambeeya, haddii laga fursan waayo uu noqdo mid waqtigiisu kooban yahay, in carruurta aan lala xirin dadka waaweyn, ay helaan matalaad sharci, in tixgelinta ugu muhiimsan ay tahay maslaxadda canuga, iyo in mudnaanta la siiyo dhaqan-celinta canuga iyo dib-ugu-biirintiisa bulshada.
- Inay xaqiijiso inaan carruurta loo xirin oo aan loo maxkamadeyn oo keliya inay xiriir la leeyihiin Al-Shabab ama urur kale oo hubaysan.
- Inay dib-u-eegis ku samayso sharcigeeda ka hortagga argagixisada, si loo xaqiijiyo inuu waafaqsan yahay heerarka caalamiga ah oo ay ka mid tahay ilaalinta awoodda maxkamadaha madaniga ah.
- Inay isbedel ku samayso sharciga garsoorka carruurta si loo qeexo in da'da qaangaarka ay tahay 18 sano, isla markaana uu ula jaanqaado heerarka caalamiga ah ee garsoorka carruurta, gaar ahaan inuu damaanad qaado hannaanka sharci, helitaanka matalaad sharci, in canuga ay xiriir la samayn karaan ehelkiisa iyo in la heli karo dhaqan-celin iyo wax bedel u noqon kara xabsiga.

## Ku Socda Ururka Al-Shabab

- Inuu degdeg u joojiyaa qorashada carruurta ka yar 18 jirka, uuna sii daayo dhammaan carruurta 18 jirka ka yar ee hadda ka tirsan dagaalyahannadiisa.
- Inuu xaqiijiyaa in taliye kasta oo lagu helo inuu qoranayo carruurta ama u adeegsanayo xeryaha tababarka ama furimaha dagaalka la mariyo ciqaabta ku haboon.
- Inuu ilaaliyo xuquuqda carruurta ay u leeyihiin waxbarashada, asagoo joojinaya faragelinta uu ku hayo manaahijta iskuullada ama in ardada loo soo bandhigo waxyaabo loogu dhiiragelinayo inay ku biiraan xooggaga Al-Shabab.

## Ku Socda Deeq-bixiyayaasha Caalamiga ah, Gaar ahaan Kuwa Taageeraya Dib-u-habaynta Ammaanka, Hubkadhigidda, iyo Mashaariicda Dib-ugu-biirinta Bulshada

- Inay si shaac baxsan u taageeraan tallaabooyinka kor lagu xusay si loo xaqiijiyo in mas'uuliyiinta Soomaaliya ay xoojiyaan ballanqaadkooda si carruurta lagu eedeeyay inay ka tirsanaayeen ururada hubaysan ay u helaan difaaca iyo kaalmada ay u baahan yihiin.
- Inay xaqiijiyaan in dhammaan barnaamijyada ka hortagga argagixisada iyo kuwa loo fidiyo dagaalyahannadii hore ay tixgeliyaan xuquuqda, baahida iyo difaacidda carruurta ay saamaysan colaadda hubaysan.
- Inay si shaac baxsan u taageeraan, xooggana u saaraan dib-u-eegis ku sameeyaan shuruucda federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada ee hadda jira iyo kuwa soo socda, gaar ahaan hindise sharciyeedka ka hortagga argagixisada, xeerka ciqaabta ee wax laga bedelay iyo siyaasadaha ku wajahan Al-Shabab, si ay u waafaqsanaadaan heerarka caalamiga ah ee xuquuqda carruurta iyo garsoorkooda; ayna taageero farsamo siiyaan dadaallada ku aaddan arintaasi.
- Inay taageero dhaqaale, kuwo farsamo iyo ammaan ku bixiyaan xaqiijinta in carruurta loo hayo kiisaska la xiriira Al-Shabab si degdeg ah loogu wareejiyo hannaanka garsoorka carruurta.
- Inay ugu baaqaan dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada inay u ogolaadaan hay'adaha samafalka ee madaxa bannaan in si joogta ah ay u kormeeri karaan xarumaha lagu hayo carruurta, oo ay ka midka yihiin xarumaha ay leeyihiin hay'adaha difaaca xuquuqda carruurta iyo xabsiyada ay maamulaan hay'adaha sirdoonka, gaar ahaan xilliyada baaritaanka carruurta lagu eedeeyay inay ka tirsanaayeen Al-Shabab.
- Inay ku taliyaan magacaabidda madaxa xuquuqda carruurta oo qeyb ka ah Guddiga Qaran ee Xuquuqda Aadana ee mustaqbalka la samayn doono, qofkaasi oo mas'uul ka ah la socoshada kiisaska carruurta u xiran inay xiriir la leeyihiin Al-Shabab.
- Inay taageeraan dadaallada lagu samaynayo qaabab bedel u noqon kara xabsiyada iyo garsoorka carruurta, gaar ahaan barnaamijyada dhaqan-celinta, u

adeegidda bulshada iyo dusha kala socod heer bulsho ah iyo barnaamij isugu jira tababar iyo waxbarasho.

- Inay ka taageeraan dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada xaqiijinta in xariga carruurta uu waafaqsan yahay heerarka caalamiga ah - gaar ahaan ayadoo la xaqiijinayo in xariga uu yahay xalka ugu dambeeya, in carruurta aan lala xirin dadka waaweyn, ay helaan matalaad sharci, in tixgelinta ugu muhiimsan ay tahay maslaxadda canuga, iyo in mudnaanta la siiyo dhaqan-celinta canuga iyo dib-ugu-biirintiisa bulshada.
- Inay dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada u fidiyaan kaalmo agaasiman si loo sameeyo hannaan cadaalad gaar u ah carruurta; inay fidiyaan taageero mudada dhexe ah oo ku aaddan dadaallada lagu xaqiijinayo in tiro garsoorayaal, dacwad oogayaal iyo qareennada difaaca ah ay helaan tababar ku aaddan heerarka cadaaladda carruurta.
- Inay taageeraan dadaallada hay'adaha NISA, PIA iyo kuwa kale ee ku hawlan ammaanka loogu fidinayo tababar ku aaddan xuquuqda iyo difaaca carruurta, si wanaagsan ula dhaqankooda, iyo in baaritaannada ay fuliyaan khubaro rayid ah, isla markaana lagu ixtiraamo xuquuqda carruurta.
- Inay xaqiijiyaan in nidaam kormeer oo adag uu ka jiro dhammaan xarumaha lagu dhaqan-celiyo dadka qaangaarka ah ee horay usoo dagaallamay, si loo xaqiijiyo in carruurta halkaa ku sugan degdeg lagu garto laguna wareejiyo xarumaha dhaqan-celinta ee ku haboon.
- Inay taageeraan tallaabooyinka ku haboon ee lagu difaacayo carruurta iyo barnaamijyada dhaqan-celinta, dib-ugu-biirinta bulshada iyo kuwa isugu jira tababar iyo waxbarasho; iyo tallooyinka caafimaad, bulsho iyo maskaxeed ee carruurta loo fidiyo gaar ahaan kuwa loo geystay tacaddiyada galmo.
- Inay taageeraan barnaamijyada caafimaadka maskaxda ee la siinayo carruurta u baahan kaalmada ka ballaaran kuwa lagu helo xarumaha bulshada ee lagula tacaalo caafimaadka guud ee maskaxda.
- Inay ka taageeraan dowladda Soomaliya sidii ay sharciga dalka ugu dari lahayd, una fulin lahayd Axdiga Xuquuqda Carruurta, ayna u saxiixi lahayd oo u meelmarin lahayd borotokoolka khiyaariga ah ee Axdiga Xuquuqda Carruurta ka qeyb qaadata colaadaha hubaysan.

## Ku Socda Hay'adda Qaramada Midoobay U Qaabilsan Carruurta (UNICEF)

- Inay la shaqeyso kooxda Qaramada Midoobay u joogta Soomaaliya si loo xoojiyo dusha kala socoshada iyo ka warramidda tacaddiyada ka dhanka ah carruurta, gaar ahaan kuwa lagula kaco carruurta loo xiray dembiyada ammaanka.
- Inay ballaariso mashaariicda dhaqan-celinta iyo dib-ugu-biirinta bulshada ee carruurta ka tirsanaa ururada hubaysan si loo xaqiijiyo in carruurta xaqa u leh ay helaan barnaamij ku haboon; inay xaqiijisaa in carruurta lagu dhaqan-celiyo goobo u dhaw deegaanka ay kasoo jeedaan, haddii ay ammaan yihiin.
- Inay ugu baaqdo dowladda Soomaaliya in si shaax baxsan ay u qeexdo xaaladda sharci ee carruurta ku jira xarumaha dhaqan-celinta ee ay taageerto UNICEF.
- Inay mudnaanta siiso samaynta iyo meelmarinta qorshaha nidaamka hawlgalka caadiga ah ee soo dhaweynta iyo wareejinta carruurta, kaasoo qeexaya hannaanka iyo sharciga la marayo.
- Inay dowladda ugu baaqdo magacaabidda madaxa xuquuqda carruurta, kaasoo mas'uul ka ah la socoshada kiisaska carruurta u xiran inay xiriir la leeyihiin Al-Shabab.
- Inay taageerto in mudada fog la sameeyo hannaan cadaalad gaar u ah carruurta; ayna gacan ka geysato in mudada dhexe garsoorayaasha rayidka ah, dacwad oogayaasha iyo qareennada difaaca ah ay helaan tababar ku aaddan heerarka cadaaladda carruurta.
- Inay maamullada kala shaqeyso meelmarinta nidaamka qiimeynta da'da ee mudnaanta siinaya in waraysiyo lala yeesho canuga, ehelkiisa iyo bulshada; haddii ay cadaan weydo da'da canuga, waa in loo raacaa sida uu rabo; inay tababar siiso dadka mas'uulka ka ah qiimeynta da'da.
- In ayadoo kaashaneysa UNSOM, dowladda iyo ururada bulshada rayidka ah ay taageerto xaqiijinta in dhammaan carruurta ay helaan matalaad sharci oo ku filan inta lagu guda jiro heerarka kala duwan ee baaritaanka garsoorka.
- Inay sii wado kala shaqeynta UNSOM tababarka ay u fidiyaan hay'adaha sirdoonka ee ku aaddan difaacidda xuquuqda carruurta; ayna ku baaqdaa in dusha lagala socdo hannaanka baaritaanka.

## Ku Socda Hawlgalka Kaalmaynta Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNSOM)

- Inuu dabagal joogta ah ku sameeyo tacaddiyada xuquuqda carruurta ee lasoo wariyo; inuu si joogta ah u tago xabsiyada carruurta iyo maxkamadaha dacwadahooda qaada, waa haddii uu ammaanka saamaxayo, gaar ahaan xarumaha ay maamusho NISA.
- Inuu iskaashi kala sameeyo UNICEF sidii loo sii deyn lahaa, dhaqan-celinna loogu samayn lahaa carruurta lala xiriiriyo ururada hubaysan.
- Inuu ku dhiirageliyo AMISOM iyo dhammaan dalalka ciidamada ku biiriyay inay si nidaamsan u diiwaangeliyaan ayna Qaramada Midoobay ku wargeliyaan marka ay ciidamadooda qabtaan carruurta ama ku wareejiyaan maamullada ka jira Soomaaliya.
- Inuu taageero samaynta nidaam lagu ururiyo macluumaadka carruurta u xiran dowladda, asagoo kaashanaya hay'adaha ka shaqeeya xarumaha dadka lagu hayo.
- Inuu sii wado kala shaqeynta UNICEF tababarka ay u fidiyaan hay'adaha sirdoonka ee ku aaddan difaacidda xuquuqda carruurta; ayna ku baaqdaa in dusha lagala socdo hannaanka baaritaanka.

## Ku Socda Waaxda Qaramada Midoobay ee Arimaha Siyaasadda iyo Xafiiska Xuquuqda Aadanaha

- Xaqiijinta in dabagal joogta ah lagu sameeyo tacaddiyada xuquuqda carruurta ee lasoo wariyo; inuu si joogta ah u tago xabsiyada carruurta iyo maxkamadaha dacwadahooda qaada, waa haddii uu ammaanka saamaxayo, gaar ahaan xarumaha ay maamusho NISA.

## Ku Socda Hawlgalka AMISOM iyo Dalalka Ciidamada Ku Biiriyay

- Xaqiijinta in la raaco nidaamka hawlgalka caadiga ah ee soo dhaweynta iyo wareejinta ee AMISOM u degsan, iyo inay si nidaamsan u diiwaangeliyaan ayna Qaramada Midoobay ku wargeliyaan marka ay ciidamadooda qabtaan carruurta ama ku wareejiyaan maamullada ka jira Soomaaliya.

## Ku Socda Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay

- In aanu meesha ka saarin waajibaadka ilaalinta xuquuqda carruurta iyo xuquuqul insaanka marka ay mudada u kordhinayaan UNSOM.
- Inuu dabagal ku sameeyo gunaanadka warbixinnada ku aaddan carruurta iyo colaadda Soomaaliya, gaar ahaan marka laga doodayo muddo kordhinta.

# "Waa Sida Inaan Marwalba Ku Jirno Xabsi"

## Tacaddiyada Ka Dhanka Ah Wiilasha Lagu Eedeeyay Dembiyada Ammaanka Qaran ee Soomaaliya

Ururka Al-Shabab ee Soomaaliya ayaa qortay oo dagaalyahanno ka dhigtay boqolaal carruur ah. Balse dhibaatada iyo tacaddiyada ay la kulmaan carruurtaasi ayaa sii socday xataa markii ay soo dhuunteen ayna gacanta u galeen ciidamada dowladda.

Warbixintan oo cinwaan looga dhigay *"Waa Sida Inaan Marwalba Ku Jirno Xabsi": Tacaddiyada Ka Dhanka Ah Wiilasha Lagu Eedeeyay Dembiyada Ammaanka Qaran ee Soomaaliya* ayaa lagu diiwaangeliyay qaabka loola dhaqmay carruurta tan iyo 2015 loo xiray tuhunka ah inay xiriir la leeyihiin Al-Shabab. Waxay ku salaysan tahay waraysiyo lala yeeshay in ka badan 80 qof oo ay ku jiraan carruur horay loogu qasbay inay la tababartaan ama taageeraan Al-Shabab, ehelkooda, wiilal lagu xiray xarumaha booliska iyo sirdoonka, qareenno, dadka u doodda xuquuqda carruurta iyo mas'uuliyiin ka tirsan dowladda.

Warbixinta ayaa lagu ogaaday in maamullada ka jira guud ahaan Soomaaliya ay carruurta u xiran kula kacaan tacaddiyo ballaaran, sida in qasab lagu qirsiiyo dembiyada iyo inaan loo ogolaan inay la kulmaan xubnaha qoyskooda. Carruurta dacwdaha lagu soo oogo ayaa la horgeeyaa maxkamadaha milateriga, hannaanka cadaaladana ma aha mid gaarsiisan heerarka caalamiga ah ee garsoorka carruurta. Shuruucda jira ama kuwa soo socda ayaa xaaladda uga sii daraya, waxaana ay dhigayaan in carruurta loo qabto loona maxkamadeeyo dembiyada la xiriira Al-Shabab ayadoo aan la marin garsoorka carruurta ee asaasiga ah si loo difaaco xuquuqdooda. Marka ay maamullada ku wareejiyaan carruurta xarumaha dhaqan-celinta ayaa inta badan waxa uu mugdi ku jiraa xaaladdooda sharci.

Human Rights Watch ayaa ugu baaqaysa dowladda Soomaaliya inay joojiso xariga aan loo meeldeyin ee ay kula kacdo carruurta, ayna ogolaato hannaan madax bannaan oo lagula socon karo carruurta xiran. Carruurta la xiray waa in si degdeg ah loogu wareejiyaa xarumaha dhaqan-celinta iyo in marka ay suuragalka tahay dib loogu biiriyaa bulshada. Waa in carruurta lagu eedeeyay dembiyada waaweyn la horgeeyaa maxkamadaha madaniga ah si waafaqsan heerarka garsoorka carruurta.



*Askari waardiye ah oo ku sugan xabsi ku yaal Garowe, Puntland, waqooyi bari Soomaaliya bishii Disembar 2016. 54 wiil oo qaarkood ay 12 jir yihiin oo uu ururka Al-Shabab usoo diray inay la dagaallamaan ciidamada Puntland ayaa muddo bilooyin ah ku xirnaa xabsigan. Maxkamad milateri ayaa 28 ka mid ah wiilashaasi ku xukuntay sanado badan, oo ay hadda ku gudanayaan xarun dhaqan-celin oo ku taal Garowe.*

*© 2016 Mohamed Abdiwahab/AFP/Getty Images*